



## **Barnaamijka Dibu-nooleynta Dhaqaalaha Dadweynaha Caadiga ah**

### **(Overview paragraph for audio translation)**

#### **Warbixin Guud:**

Codsiyada deeqda hadda waa ay u furan yihiin Barnaamijka Dibu-nooleynta Dhaqaalaha Dadweynaha Caadiga ah ee St. Paul. Ururka Samafalka Saint Paul & Minnesota Foundation waa mid ka mid ah ururrada iskaashiga ah ee Waaxda Shaqada iyo Horumarinta Dhaqaalaha (DEED) Barnaamijkeeda Dibu-nooleynta Dhaqaalaha ee Dadweynaha Caadiga ah. Barnaamijka Dibu-nooleynta Dhaqaalaha Dadweynaha Caadiga ah ee East Metro waxaa lagu qeybin doonaa ilaa \$7 milyan oo ah deeqaha meheradaha iyo ururrada aan ahayn macaashdoonka ee **Deegaamada kala ah Snelling-University-Rice Cultural District, deegaamada East Side iyo ilaa West Seventh Street.**

Lacagaha deeqda ah waxaa loo isticmaali doonaa in lagu taageero mashaariic ah soo-kabasho dhaqaale oo waxa hoggaamin doona ururro aan ahayn macaashdoon iyo meherado ay ku dhacday dhibaatadii COVID-19, xiritaan ah meheradihii iyo/ama shaqa-la'aanta deegaanka, iyo burbur hantiyeed oo uga yimid kacdoonkii dadweynaha ee ka dib dilkii George Floyd. Mashaariicda xaq loo yeelan karo waxaa ka mid ah horumarin, dibu-dhisid, burburin, diyaarinta goobta, naqshadeyn hore, naqshadeynta, injineerin, dayactirid, ama cusbooneysiinta dhismaha ama kabista raasumaalka. Hawlahaas waxaa ka mid noqon kara balse aysan ku xaddidneyn waa: dhisidda dhismaha, kaabeyaal dhaqaale, iyo waxyaabo la xiriira bilicda, hagaajin ah cagaarka bannaanka ama qurxinta jidka.

Mashaariicda xaq u leh **kuma jiraan** iibsasho dhuleed ama hawlaha lagu wado ganacsiga ama kharashaadka hawlgalka ganacsiga, sida keydsiga alaabta, mushaarka ama raasumaalka lagu shaqeynayo.

#### **Maabka**

Meheradaha iyo ururrada **waa in** ay ku yaallaan deegaamada jidadka soo socda si ay xaq ugu yeeshaan deeqaha. Meheradaha ku yaalla dhinacyada isgoysyada jid kasta oo ka mid ah deegaamada hoose ayaa soo codsan kara.

#### **Snelling-University-Rice Cultural District**

- Snelling Avenue: Portland Avenue ilaa Englewood Avenue
- University Avenue: Fairview Avenue ilaa Rice Street
- Rice Street: University Avenue ilaa Larpenteur Avenue

#### **East Side Community**

- East 7<sup>th</sup> Street: Olive Street ilaa Arcade Street
- Payne Avenue: East 7<sup>th</sup> Street ilaa Maryland Avenue

- Arcade Street: East 7<sup>th</sup> Street ilaa Maryland Avenue
- White Bear Avenue: Suburban Avenue ilaa Larpenteur Avenue
- I-94 (Suburban Ave/Old Hudson Rd.): White Bear Avenue ilaa McKnight Road

West 7<sup>th</sup> Street

- West 7<sup>th</sup> Street: Kellogg Boulevard ilaa 35E

Waxaa bartan intarnetka ah laga heli karaa jidadka deegaanka.

### **Heerka Deeqaha iyo Xaqu-yeelashada Lacagaha**

Deeqo gaaraya ilaa \$750,000 ayaa laga yaabaa in la siiyo meheradaha ay mashaariicdoodu xaqa u yeeshaan. Lacagahaas waa deeqo horumarineed, taas macnaheedu waa in ay jirto shuruud lagu heli karo deeqda. Wada-shaqeynta jirta ee urur ahaaneed, Ururka Samafalka Saint Paul & Minnesota waxaa ka go'an in ay soo helaan maalgelinta, si loogu isticmaalo ilaha maalgelinta deegaanka ah iyo ilaha dhaqaalaha ee ay haystaan codsadeyaasha.

Codsadeyaasha waxaa laga filayaa in ay la shaqeeyaan shaqaalaha caawinaya ee lagu qoro, si markaas codsadeyaasha loo fahamsiiyo habraacyada iyo si ay u soo gudbiyaan codsiyadooda. Adeegyadaas waxaa codsadeyaasha loogu qaban doonaa si ah lacag la'aan.

### **Tallaabooyinka Codsiga:**

Si aad u soo codsato, ugu horreyn waa in aad soo buuxiso Foomka Qaabilaadda Ujeedka Mashruuca. Foomkan waa macluumaadka bilowga ah ee ujeedka mashruuca xaqu-yeelashada. Codsiyada waxaa la heli doonaa xaqu-yeelashada koowaad ka dib.

Foomkan waxaad ka heleysaa barteena intarnetka isagoo ku qoran luuqado badan.

**Haddii aad u baahan tahay caawimaad dheeraad ah ama turjubaan si aad u buuxiso Foomka Ujeedka Mashruuca, soo garaac [number] si aan kuugula hadalno afkaaga hooyo, oo waxaa markaas si toos ah kuugula hadli doonaa ururka samafalka ah ee Saint Paul & Minnesota Foundation.**

Foomkaaga qaabilaadda waxaa lagu eegi doonaa 7 – 10 maalmood oo ah maalmaha shaqada oo waxaad jawaab ka heli doontaa Saint Paul & Minnesota Foundation. Dhammaan codsadeyaasha xaqa u yeesha waxaa la soo xiriiri doona shaqaalaha dadka caawiya oo markaas kala shaqeyn doona codsiyada.

### **JADWALKA CODSIGA**

Codsiyada waxaa la aqbali doonaa ilaa bisha Meey 2023 ama ilaa ay dhammaato lacagaha deeqda ah ee la bixinayo, marba kii soo hormara.

Dhammaan mashaariicda lacagta lagu bixinayo waa in lagu dhammeeyo ilaa Diseembar 2026.

**Mar labaad, Haddii aad u baahan tahay caawimaad dheeraad ah ama turjubaan, soo garaac 651.325.4202 si aan kuugula hadalno afkaaga hooyo, oo markaas waxaa si toos ah kuugula hadli doonaa ururka samafalka ah ee Saint Paul & Minnesota Foundation.**